KU DHAQAN XAFIIS D.

Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I — Muqdisho, 18 Junyo 1973 — L. 11

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W. M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 5 Juunyo 1973 — *Xiska ku Saabsan soo saaridda Qalabka Amaahda ee Dawladda. L. 54.* Bog. 171

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 5 Juunyo 1973 — *Shaqo ka eryid Dhamme Moxamed Dahir ka tirsanaa Ciidamada Biliska Somaliyeed. L. 55.* » 173

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Juunyo 1973 —*Magacaabid Gaashaanle Cumar Cabdulle Ciilmi. L. 56.* » 174

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Juunyo 1973 —*Magacaabid Gaashaanle Cali Musse Moxamed. L. 57.* » 175

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Juunyo 1973 —*Magacaabid Gaashaanle Ilaye Ciyeh Xoosh. L. 58.* Bog. 176

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Juunyo 1973 — *Dheeri (Indennità di Carica). L. 59.* » 177

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD, 26 Mjio 1973 — *Sismo dhul la siyey (E.N.E.E.). L. 60.* » 178

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD 27 Majio 1973 — *Sismo dhul la siyey Wakaaladda Muska. L. 61.* » 179

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD 27 Majio 1973 — *Sismo dhul Dowladeed la siyey Cabdullahi Mòxamud Moxade. L. 62.* » 180

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD 27 Majio 1973 *Sismo dhul Dowladeed la siyey Xabiba Cali Shidane. L. 63.* » 181

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Juunyo 1973 — *Ogeysiis Baddalaad Naado Dhu l Jaalley Fansi Cabdinuur. L. 83.* Bog. 182

WASARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Juunyo 1973 — *Ogeysiis Baddalaad Naado dhul Moxamed Ersi Weliye. L. 84.* » 182

WASARADDA HAWLAHA GUUD 11 Juunyo 1973 — *Naada Dhul Katjira Alla Betrofna. L. 85.* » 183

WASARADDA HAWLAHA GUUD 11 Juunyo 1973 — *Naada Dhul Cawarala Xayd Gurbe. L. 86.* » 183

WASARADDA HAWLAHA GUUD 11 Juunyo 1973 — *Naada Dhul Xaji Warsame Xasan. L. 87.* » 184

BANKIGA UMMADDA, 19 Marso 1973 — *Xeerka Sarrifka Lacagta Qalaad Bankiga Ummadda. L. 88.* » 185

BANKIGA UMMADDA, 17 Abrile 1973 — *Xeerka Sarrifka Lacagta Qalaad. L. 89.* » 186

MAXKAMADDA GOBOLKA BURCO, 16 Abrile 1973 — *Buugga Lacagta oo uu leyahay Xaji Axmed Moxamed Samantar. L. 90.* » 187

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

5 Juunyo 1973, L. 54.

Xiska ku saabsan soo saaridda Qalabka Amaahda ee Dawladda.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Kowaad ee Kacaanka oo 21-10-1969 iyo Xeerka Lr. 1 oo 21-10-1969 ee Golaha Sare ee Kacaanka Jamhuuriyadda Dimuqradiga ha ee Somaaliyeed;

MARKUU ARKAY Xeerka Lr. 47 ee 18-8-1970;

MARKUU ARKAY Xeerka 59 ee 20-9-1972;

ASAGOO TIXGELINAYA In loo baahanyahay in la' aruursho lacago lagu soo iibsado Marakiib la siiyo Wakaaladda Maraakiibta Ummadda;

AY SOO JEEDIYEEN Xoghayaha Wasaradda Lacagta iyo kan;

MARKUU MAQLAY Ra'yiga Golaha Xoghayeyaasha;

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Soo saaridda Qalabka

Wasaradda Lacagta waxaa loo oggolaaday in ay soo saarto boqol xabbo oo ah Qalabka Amaahda ee Dawladda oo magacaaban, mid walba qiimahiisuna uu yahay 500.000,00 (shanboqolookun) oo shilin oo ay isku gaaraan qiimahooda guud 50.000.000.00,00 (kontonmilyan) oo shilin.

Qalabka la soo sheegay waxaa saxiixaya Xoghayaha Wasaaradda Lacagta kaddibna waxaa diiwaan gelinaya Xafiiska Hantidhowrka.

Qodobka 2aad

Summadaha caanka ah ee Qalabka

Qalabka amaahda ee qodobka kowaad lagu soo sheegay waa in ay ku daabacanyhiin xaashida qiimaha leh (carta filigranata) ayna ku dhigantahay inta aan hoos ku sheegeyno:

— Astaanta Dawladda;

— Magaca Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraariga Soomaaliya oo tii soo saartay oo amaahsatay ah;
— Magaca amaahiyaha oo ah kii iibsaday kuna intifaacaya;
— Qiimaha oo ku qoran xisaab iyo farba;
— Lambarka isdabajoogga ah oo Qalabka;
— Magaca, Meesha iyo taariikhda la soo saaray Qalabka;
— Muddada kaddib qalabkaas la gudi doono;
— In uu yahay Qalab amaaheed ee Dawladda oo magacaaban oo oo laga helayo korsaar sannadkii oo 3%.

Qodobka 3aad

Habka loo gudi doono

Qiimaha guud ee Qalabka la soo saaro waxaa lagu gudi doonaa 10 sano oo qaarar ah lixdi-biloodba-sannadkiiba oo dib u daca kana bilowlowda 1-7-1975 ilaa 1-7-1984 waxaana laga helayaa korsaar sannadkii oo ah 3% (boqolkiiba saddex) marka laga bilaabo 1-7-1973 ilaa iyo dhammaadka 1-7-1984.

Qodobka 4aad

Bixinta amaahda

Gudidda amaahda oo ah rasamaal iyo korsaar waxaa laga bixinayaa kapitolka 5. 0. 0. ee miisaaniyadda Dawladda ee sannadka aan ku jirno bixinta korsaarka keliya iyo sannadka 1975 bixinta raasamaalka iyo korsaarka.

Qodobka 5aad

Cashuur Daaf

Qalabka xeerkan kor lagu soooo sheegay lacagtiisa iyo wixii korsaar ah ee ka bislaada lagama qaadi doono cashuur hadda iyo mar dambeba.

Qodobka 6aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Juunyo 1973.

GOLAHA SARE EE KACAANKA GUDDOOMIYAHA
Jaalle Sareeye Gaas Maxmad Siyad Barre

Xoghayaha Wasaaradda Lacagta
Jaalle M. Y. Weyrax

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 76.
Mogadiscio, li 11 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
5 Juunyio 1973, L. 55.
Shaqo ka eryid Dhamme Maxamud Dahir Farax ka tirsanaa Ciidamada Bolisk Soomaaliyed.

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21kii Oktobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 19d (lambarka 6d, xarafta c) ee sharciga lambarkiisu yahay 2 lana soo saaray 23kii Disembar 1972 kuna saabsan dhismada Ciidanka Boliska;

ISAGOO ARKAY Xukunkii Maxkamadda Badbaadada T 250-72 B.G.T. 90-73 B. X. ee 21kii Abril 1973 ee Dhamme Maxamud Dahir Farax laguna xukumay 10 (toban) sano oo xarig ah;

ISAGOO TIXGELIYEY Taladii uu soo jeediyay Xoghayaha Dawladda ee Wasaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1d

In Dhamme Maxamud Dahir Farax laga eryo shaqada Ciidanka Boliska ayada oo ka billaabaneysa taariikhda 21-4-1973.

Qodobka 2d

Dhamme Maxamud Dahir Farax, xuquuq kuma yeelan karo Dawladda.

Qodobka 3d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli, waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Juunyio 1973.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
S. Guuto Xusen Kulmie Afrax

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 166.
Mogadiscio, li 10 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyio 1973, L. 56.
Magacaabid Gaashanle Cumar Cabdulle Ciilmi.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Hore ee Kacaanka iyo sharciga 21 Oktobar 1969 ey T. tahay 1;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 3 ee soon baxay 10 jenayo 1970, ee dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo wixii isbeddel ah ee sharciga galay;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 7 ee soo baxay 21 jenayo 1970 ee dhisayey Qaybaha Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobollada u joogo;

MARKUU TIXGELIYEY Go'aanki Guddoomiyaha G.S.K. T. ahayd 174 ee soo baxay 29 Lulyo 1970, ee ku saabsan abaal gud lacag ku magacaawan «Lacag dheer gaarah, loo gooyay garsoorayaal M.B.D.

HADDU GARWAAQSADAY Taladii uu Guddoomiyaha M.B.D. ku taliyay ee ahayd garsooreyaalka Qaybaha M.B.D. iyo Ujoogayaasha Dadweyne Udoodaha Guud qaybaha u joogo in la siiyo lacag dheeriga gaarka ah;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

Gaashaanle Cumar abdulle Ciilmi waxaa lagu magacaabay Guddoomiyaha Qaybta Maxkamadda badbaadada Dalka ee Gobolka togdheer.

Qodobka 2aad

Go'aankani dhaqan galkiisa wuxu ka bilaabanaya 12 Marso 1972, waxana lagu dari doonaa ururka go'aannada Jamhuriyaada Dimuqradiga Soomaalied.
Xoghayaha Lagagta

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Muqdisho, 10 Juunyio 1973.

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 179.
Mogadiscio, li 14 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLE WARSAME NUR

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyio 1973, L. 57.
Magacaabid Gaashaanle Cali Muse Maxamed.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARRAY Warqadda Hore ee Kacaanka iyo sharciga 21 Oktobar 1969 ey T. tahay 1;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 3 ee soo baxay 10 Jenayo 1970, ee dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka; iyo wixii isbeddel ah ee sharciga galay;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 7 ee soo baxay 21 Jenayo 1970 ee dhisayey Qaybaha Maxkamadda Badbaadada Dalka Goballada u joogo;

MARKUU TIXGELIYEY Go'aankii Guddoomiyaha G.S.K. T. ahayd 174 ee soo baxay 29 Lulyo 1970, ee ku saabsan abaalgud lacag ku magacaawan «Lacag rheer gar ah, loo gooyay garsoorayaal M.B.D.

HADDU GARWAAQSADAY Taladii uu Guddoomiyaha M.B.D. ku taliyay ee ahayd garsooreyaalka Qaybaha M.B.D. iyo ujoogayaasha Daweyne Udoodaha Guud u joogo in la siiyo lacagta dheeriga gaarka ah;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

Gaashaanle Cali Muse Maxamad waxa lagu magacaabay Guddoomiyaha Qaybta Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Qobolka Jubada Sare.

Qodobka 2aad

Go'aankani dhaqan galidiisa wuxu ka billanaya 12 Marso 1972 waxana lagu dari doona ururka go'aannada Jamhuriyadda Dimuqradiga Soomaaliyed.

Muqdisho, 10 Juunyio 1973.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

XOGHAYAHA LACAGTA
VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 178.
Mogadiscio, li 14 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyio 1973, L. 58.
Magacaabid Gaashaanle Ileye Xoosh.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Hore ee sharciga 21 Oktobar 1969 ey T. tahay 1;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 3 ee soo baxay 10 Jenayo 1970, ee dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka; iyo wixii isbeddel ah ee sharciga galay;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 7 ee soo baxay 21 Jenayo 1970 ee dhisayey Qaybaha M.B.D. Gobollada u joogo;

MARKUU TIXGELIYEY Go'aankii Guddoomiyaha G.S.K. T. ahayd 174 ee soo baxay 29 Lulyo 1970, ee ku saabsanaa abaal gud lacag ku magacaawan «Lacag dheer gar ah, loo gooyay garsoorayaal M. B.D.

HADDUU GARWAAQSADAY Taladii uu Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Ujoogayaasha Dadweyne Udoodaha Guud qaybaha u jòogo in la siiyo lacagta dheeriga gaarka ah;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

Gaashaanle Ileye Ciye Xoosh waxaa lagu magaabay Guddoomiyaha Qaybta Maxkamadda Bdbaadada Dalka ee Gobolka Hargeisa.

Qodobka 2aad

Go'aakani wuxu dhaqan galidoona markii lagu dhigo «Bollettino Ufficiale» waxana lagu daridoona ururka go'aannada Jamhuriyadda Dimuqradiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 10 Juunyio 1973.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

XOGHAYAHA LACAGTA
VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 180.
Mogadiscio, li 14 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyio 1973, L. 59.
Dheri (*Indennità di Carica*).

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Hore ee Kacaanka iyo sharciga 21 Oktobar 1969 ey T. tahay 1;

MARKUU ARKAY Sharciga T. ahay 3 ee soo baxay 10 Jenayo 1970; ee dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka; iyo wixii isbeddel ah ee sharciga galay;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 7 ee soo baxay 21 Jenayo 1970 ee dhisayey Qaybaha M.B.D. Gobollada u joogo;

MARKUU TIXGELIYEY Go'aanki Guddoomiyaha G.S.K. T. ahayd 174 ee soo baxay 29 Lulyo 1970, ee ku saabsanaa abaalgud lacag ku magacaawan «Lacag dher gaar ah, loo gooyay garsaarayaal Maxkamadda Badbaadada Dalka;

HADDUU GARWAAQSADAY Taladii uu Guddoomiyaha M.B.D. ku taliyay ee ahayd garsoorayaalka Qaybaha M.B.D. iyo Ujoogayaasha Dadweyne Udoodaha Guud qaybaha u joogo in la siiyo lacagta dheeriga gaarka ah;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

Guddoomiyayaasha iyo Garsoorayaasha qaybaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada kana tirsan Ciidammada Qalabka Sida, ee aanan qaadan dheeri kale (Indennità di Carica) waxay xaq u leeyihiin bilkastaba abaalgud dheeri ah qiima-hiisuna yahay Shs. 400/- Guddoomiyaha, iyo Shs. 300/- Garsooraha. Sidaasoo kale waxa dheeri qiimihiisu yahay Shs. 200/- bishiiba u leh wakiilada Dadweyne Udoodaha Guud u jooga Qaybaha M.B.D. ee dacwadda ku ooga Maxkamadda Horteeda.

Qodobka 2aad

Go'aankani dhaqan galkiisa wuxuu ka soo bilaaban doonaa 1da Majo 1973, waxaana, faafintiisa kabid, lagu dari doono ururka go'aannada Jamhuriyadda Dimoqradiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 10 Juunyio 1973.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

XOGHAYAHA LACAGTA
VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 177.
Mogadiscio, li 14 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD

26 Mjio 1973, L. 60.

Sismo dhul la siyay (E.N.E.E.) in laga dhiso guri xoojiya dabka. (Cabina di trasformazione) kuna yaal Xafadda 21ka Oktobar.

XOGHAYAHA DOWLADDA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Warqada tiradeedu tahay L. 9560-77 taarikrdeeduna aheyd 14-3-1973, ku saabsan weydin dhul dawladeed sababtoo ah in laga dhiso guri xoojiya dabka (Cabina di trasformazione);

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hubsiimada dhulka ay qortay xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeeduna aheyd 14-5-1973;

HAMAR XEER

Waxaan la caddeynayaa in E.N.E.E. la siiyay dhul dawladeed ee cabirkiisuna yahay mt. 15x10 wuxuuna la mid yahay 150 mdh. Xafadda 21ka Oktobar.

Sohdimo: — Waqooyi 21ka Oktobar, Koofur dhul dawladeed, Galbed gabal dhul ah L. 99, Bari Jidka H. Wadag.

Moqdisho, 26 Mjio 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Re. n. 1, foglio n. 29.
Mogadiscio, li 31 Maggio 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULAHI WARSAME NUR

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD

27 Majio 1973, L. 61.

Sismo dhul la siyay Wakaaladda Muuska (Ente Banane) kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Shingaani.

XOGHAYAHA DOWLADDA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO RAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Waraqada tiradeedu tahay DG-MA-L. 7402-72 taarikhdeeduna aheyd 27-12-1972, ku saabsan weydiin dhul dawladdeed sababtoo ah in Wakaladda Muuska (ENTE BANANE) ku dhisto xafiisiyo;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hubsiimada dhulka ay qortay xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeeduna ahayd 27-12-1972;

HAMAR XEER

Waxaan la caddeynayaa in Wakaaladda Muuska (ENTE BANANE) la siiyay dhul dawladeed ee cabirkiisuna yahay mt. 39x55 ku fahiyaa 2.154 mhd. kuna yaal — Muqdisho — Xafadda Shingani.

Sohdimo: —Waqooyi Jid, Koofur Aroonika, Galbeed Guryo Dawladeed Bari Jid.

Muqdisho, 27 Majio 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 28.
Mogadiscio, li 31 Maggio 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLE WARSAME NUR

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD

27 Majyio 1973, L. 62.

Sismo dhul Dowladeed la siyey Cabdillahi Moxamud Moxamed.

XOGHAYAHA DOWLADDA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunki kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Cabdullahi Moxamud Moxamed tiirikhdeeduna aheyd 30-11-1956 kuna yaal X. Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey xafiiska ku shaga lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee dawladda; L. 11 taarikhdeeduna aheyd 1-11-1957;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolanishii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshada dhismaha lambarkoodu yahay 39 bishii Marzo 13kii 1973 soona gudubtay fadhigii 18°; add;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu ahay L. 117 taarikhdeeduna 2-3-1958 n Cabdullahi Moxamud Moxamed Sh. So. 288;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshada ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay L. 311372 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fahiyay 576 mdh.;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qanunka siismada dhulka iyo naqashada oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

HAMAR XEER

Waxaan la caddeynayaa in Cabdullahi Maxomud Moxamed la siiyey dhul dawladeed ee ku fadhiya 576 mdh. kuna yaala Muqdisho — Xafadda Waberi.

Muqdisho, 27 Majio 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 31.
Mogadiscio, li 4 Giugno 1973.
Il Magistrato ai Coni:
Magg. ABDUULHAI WARSAME NUR

XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD
27 Mayio 1973, L. 63.
Sismo dhul dawladeed la siyey Xabiba Call Shidane.

XOGHAYE DOWALADDA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Cabdullahi Moxamed Jumale taarikhdeeduna aheyd 16-6-1966 kuna yaal Xafadda 21 Oktobar;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey xafiskii ku shaga lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee dawladda;

ANNAGOO ARAGNAYOgolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqhada dhismaha lambarkoodu yahay 476 bishii Marzo 13kii 1973 soona gudubtay fadhiga 18°;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu ahay L. 81795 taarikhdeeduna 28-2-1973 in Cabdullahi Moxamed Jumale uu dhibay xafiiska Canshurta dawladda lacag tiradeedu tahay Sh. So. 900, (Sagalboqol);

ANNAGOO ARAGNAY Xaashada ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay WRG-3-23-238 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiyay 600 mdh.;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qanunka siismaha dhulka iyo maqashada oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 3828 taarikhdeeduna aheyd 6da Marso 1973 oo lagu qoray buuga Canshurta L. 137 nugul ee ah xafiska Canshurta L. 20, oo lagu dhigay xafiska Notayaha Sr. Musse Xusen Sadig, oo ku saabsan kalagadasho dhul banan oo ay kalagateen Jaalle Cabdullahi Maxamed Jumale oo ka gadatay Jaalle Xabiba Cali Shidane — dhulka la mid ah mq. 600, yaal xafadda 21kii Oktobar;

HAMAR XEER

Waxaan la caddeynayaa in Xabiba Cali Shidane la siiyey dhul dawladeed ee ku fadhiya 600 mdh. kuna yaala Muqdisho — Xafadda 21kii Oktobar.

Muqdisho, 27 Mayio 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 30.
Mogadiscio, li 3 Giugno 1973.

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Fanzi Abdinur kuna yaal Muqdisho, xafadda IV Km. Afgoye T. G. N. 702-62

Jaalllaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda IV Km. Afgoye, kuna fadhiya 2.000 mdh., waxyaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 546309-62 — 12-9-62, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Mudqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi gabal dhul lam. 185; Koofur Jid; Galbeed gabal dhul lam. 174; Bari Jid.

Muqdisho, 7 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 83) *Moxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Ersi Weliye - Hadeer waxaa iska leh Cali Guled Roble kuna yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye T. G. N. 1239-57.

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye, kuna fadhiya 1400 mdh., waxaa la caddeynayaa in loga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 312295-23-5-58, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Jid; Koofur gabal dhul Lam. 57; Galbeed gabal dhul Lamb. 21; Bari Jid.

Muqdisho, 7 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 84) *Moxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Katjira Alla Betrofna, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 31-5-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowledeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaqshiid, oo leh qiyaas Afar gees isle'eg, kuna fadhiya 38x20 — 760 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul 1,44 bis; Koofur Jid; Galbeed Jidka Jeneral Daud; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 85) *Moxamed Cbdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cawrala Xayd Gurre, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 14-1-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas 4 gees isle'seg kuna fadhiya 12x12 — 144 mdh.

Soohdin: Waqooyi Moxamed Cawad; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Shikh Abuukar.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 86)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaji Warsame Xasan, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 20-7-1969, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho Km. 5 Hagga Afgoye, oo leh qiyaas rektangular, kuna fadhiya 55,5x11,7 — 649,35 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhulkiisi hore; Koofur dhu 1 Lamb. 440-60; Galbeed dhul Lamb. 660-60; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

(L. 87)

XEER Lr. 40 ee 19 Marso 1973

Xeerka Sarrifka Lacagta Qalaad. (Deutsche Mark).

TALIYAHA IYO MAAMULAHA GUUD EE BANKIGA QARANKA SOOMAALIEED

AYAGOO ARKAY Qodobka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO OGSOON Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimhii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Ururka Lacagaha Adduunka, ee sì rasmi ah u soo ogeysiiyey Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO ARKAY Go'aanka degdegta ah Lr. 119 ee 19 Marso 1973, aay qaateen Guddiga Maamulka la'aantiis, ayagoo u cuskanaya qodobka Lr. 12 qaybta 4aad Amarka Lr. 6 ee 19kii Oktobar 1968, laguna beddelay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar 1968.

WAXAY GOOYEEN

Qodobka 1aad

Xeerka sarrifka lacagta qalaad (D.M.), ee lagu caddeeyay kuwa Lr. 5 ee 13 Marso 1967, Lr. 8 ee 27 Nofembar 1967, Lr. 13 ee 19 Lulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktobar 1969, Lr. 1969, Lr. 21 ee 11 Majio 1971, Lr. 22 ee 19 Majo 1971, Lr. 24 ee 27 Agosto 1971, Lr. 27 ee 22 Desembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannayo 1972, Lr. 32 ee 4 Lulyo 1972, Lr. 34 ee 27 Nofembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febrayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febrayo 1973 iyo 39 ee 6 Marso 1973, waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran marka laga bilaabo 19 Marso 1973.

Lacagaha Qalaad	Iibsashada oo Shilin ah	Gadidda oo Shilin ah
D. M. 1.00	2.2356	2.2799

Xeerkan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dmuqradiga Soomaaliyeed, wuxuuna hirgeli doonaa 19ka Marso, 1973.

Muqdisho, 19 Marso 1973.

CUMAR AXMED CUMAR — Maamulaha Guud

CABDIRAXMAN NUR XIRSI — Taliye

BANKIGA UMMADDA

XEER Lr. 41 ee 17 Abril 1973

Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. (US$ iyo Lit.).

TALIYAHA IYO MAAMULAHA GUUD EE BANKIGA QARANKA SOOMAALIEED

AYAGOO ARKAY Qodobka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 26kii Sebtembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO OGSOON Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Ururka Lacagaha Adduunka, ee sì rasmi ah u soo ogeysiiyey Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqlaha waddankeenna.

AYAGOO ARKAY Go'aanka degdegta ah Lr. 120 ee 17 Abril 1973, aay qaateen Guddiga Maamulka la'aantiis, ayagoo u cuskanaya qodobka Lr. 12 qaybta 4aad Amarka Lr. 6 ee 19kii Oktobar 1968, laguna beddelay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar 1968.

WAXAY GOOYEEN

Qodobka 1aad

Xeerka sarrifka lacagaha qalaad (US$ iyo Lit.), ee lagu caddeeyey kuwa Lr. 5 ee 13 Marso 1967, Lr. 8 ee 27 Nofembar 1967, Lr. 13 ee 19 Yulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktobar 1969, Lr. 21 ee 11 Majo 1971, Lr. 22 ee 19 Majo 1971, Lr. 24 ee 27 Agosto 1971, Lr. 27 ee 22 Disembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannayo 1972, Lr. 32 ee 4 Lulyo 1972, Lr. 34 ee 27 Nofembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febrayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febrayo 1973, Lr. 39 ee 6 Marso 1973 iyo Lr. 40 ee 19 Marso 1973, waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran marka laga bilaabo 17 Abril 1973.

Lacagaha Qalaad	Iibsashada oo Shilin ah,	Gadidda oo Shilin ah
Lit. 92,36	1.0000	———
Lit. 90,68	———	1.0000
US$ 1.00	6.1704	6.2327

Xeerkan waxaa lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriayadda Dimuqradiga Soomaaliyeed, wuxuuna hirgeli doonaa 17ka Abril 1973.

Mudisho, 17 Abril 1973.

CUMAR AXMED CUMAR
Maamulaha Guud
(L. 89)

CABDIRAXMAN NUR XIRSI
Taliyaha

MAXKAMADDA GOBOLKA BURGO

16-4-73. HORTEDA: — Sharif Xaji Dhere Gudomiya Maxkamadda Gobolka, Burco.

XAJI AXMED SAMATAR — Shegte.

BANKIGA KAYDSIGA IYO AMAAHDA SOMALIYED

LAANTA BURGO — Lo Shegte

Weedistay Xaji Axmed Maxamed Samatar wa joga Maxkamadda.

Weedistay Xaji Axmed Maxamed Samatar 50-jire Moslem wa dhartay: «Aniga Jeega Wareega Lambarkiisu yahay 007815 lacagtiisuna 10,000 shilin taariikhdiisuna 21-12-72 oo ku qoran magacega, mudadu iga lumay wax ay ahay 23-12-72, sida dared waxaan ka codsanaya inaad jeega wareega ee lambarkiisa aan kor ku soo qoray ee iga lumay la tirro oo lacagtisii la ii siyo. Jeega markaan ka qaday Bankega waxaan uu dhibay ninka la yirrahdo Cabdi Ismail oo ah shariigkega iyo wakiilkega oo joga Magalada Berbera, marki uu garay Berbera kolkiiba wuxuu ii soo diray taar uu yirri jeegi wa iga lumay aniguna markiiba waan ogeysiyay Bankiga laanta Burco iyo Boliska Burco in jeega lamberkiisu yahay 007815 lacagtiisuna tahay 10,000/- shilin ii nu iga lumay. Sida darted iyaan Bankiga laaanta Burco aan arjiiyo uu qorey oo aan uu shegay sida jeegasu iga lumay, dabadedna Bankiguna wuxu ii soo diray Maxkamadda Gobolka Burco. Anigo ah Xaji Axmed Maxamed Samatar waxaan ku dhartay in jeega wareega ee aan lamberkiisa kor soo qoray inu iga lumay oo lacagtiisi iga maqantahay.

XAJI AXMED MAXAMED SAMANTAR

Hoteda iyu ku saxaeexay.
Burco, 16 Abril 1973.

SHARIF XAJI DHERE
Gudomiyaha Maxkamadda Gobolka Burco

(L. 90)